

## AAR IYO DABAGGAALLE

Casharka 64aad



Aar iyo dabaggaalle ayaa geel wada lahaan jirey. Dabaggaaluhu wuxuu lahaa hal qura. Aarkuna wuxuu lahaa sagaal iyo sagaashan halaad. Maalintii dambe ayuu aarkii yiri “War dabaggaallow, meel naq leh baan raadinayaaye, geeli waa kaa xerada ku jira ee sii ilaali” Dabaggaalluhu na waa wax yar oo, geelii buu ooddii ka rogi kari waayay. Markaasaa geelii i.....

Dabadeed ayuu so noqday aarkii. Markaasuu arkay siduu yahay geelii. Markaasuu carooday. Dabaggaallihii buu ku yiri “ Waan ku cunayaa, mar haddaad waxan samaysay”. Dabaggaallihii ayuu liqay aarkii. Markaasaa dabaggaallihii na markuu calooshii aarla tagay, ayuu ilkihiisii yar yaraa ku jarjaray caloosha iyo xidmihii iyo wixii uur-kujiraha oo dhan. Markaasuu dabadii ka so baxay. Halkaasuuna aarkii ku dhintay. Markaasuu dabaggaallihiiina yeshay geelii oo dhan. Markaasuu heesay. Wuhhuuna yiri: “Nin yar oo nin weyn dilay maaragteen? Dabaggalle aar dilay maaragteen?”

**Layligii 64aad:**

.....